



## Yaa iga caawin kara arrimahayga la xidhiidha Heyadda Maraynkanka ee Adeegayada Wadanimada iyo Soogalaytiga (USCIS).

Adiga ayaa hortagi kara USCIS. Dad badan oo ay ka mid yihiin qoyskaaga ayaa kuu buxin kara foomamka USCIS wixii macluumaad ah ee aad siiso. Dadkan waxay kaa qaadan karaan xoogaa lacag ah ama lacag la'aan. Hase yeeshee, dad aqoon leh oo keliye ayaa kaala talin kara ama ku meteli kara USCIS.

Talada dhinaca sharciga waxay ka koobnaan karta:

- Sia aad uga jawaabayso foomamka soogalaytiga (qaxootiga);
- Dhawrka talo ama waxyaabaha kuu banaan ama kuu furan inaad kala doorato.

Sharciyan, dadka keliya ee talo qaanuuni ah ku siin kara ama kuu hor istaagi kara USCIS iyagoo adiga kaa socda waa:

- Garsoorayaasha; iyo
- Wakiilo aan garyaqaano ahayn laakiin aqoonsi ka haysta Guddiga Ra'faanka ee Soogalaytinnimada (BIA).

Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan garsoorayaasha iyo BIA ka raadso [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams).

Iyadoo uu si toos ah u kormeerayo garsoore, wakiilada la aqoonsan yahay, ama macallimiinta Jaamacada mararka qaarkood, ardayda kulliyada sharciga iyo ardayda ka soo qalinjabisay Kulliyadah sharciga ee la aqoonsan yahay ayaa kaala talin kara arrimaha soogalaytiga iyo qaxootiga. Ardaydani ama kuwan ka soo qalin jabiyay jamacadahu lagama yaabo inay wax kharash ah kaa qaataan. Ka eeg [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams) wixii macluumaad dheeraad ah.

“Notarios,” nootaariyada shaciga, iyo la taliyeyaasha qaxootiga ama soogalaytigu kalama talin karaan kumana masali karaan USCIS horteeda. Dalalka qaarkood dhammaan dakka “nootariyooyinku” haystaa waa garyaqaano. Maraynkanka arrintani sidaa way ka dudwan tahay. Nootariiyada Maraynkanku kuma xidhna in qofku garyaqaan yayay, talona kama bixin karo arrimaha sharci sida “nootariyooyinka” dalalka kale uga bixiyaan.

## Sideen u heli kara garyaqaan liisan leh ama wakiil haysta aqoonsiga BIA oo bilaash ama lacag yar iigu shaqeeya.

Ka firso [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams) liiska ama taxanaha adeegyada sharciga ee bilaash ama lacag yar lagu heli karo; ama telefoonka 1-800-378-5283.

## Sidee baan u garan kara inuu qofka i caawinayaa haysto ogolaansho uu dadka kala taliyo dhinaca sharciga?

Macluumaadka ku saabsan sida loo xaqiijin karo in uu garyaqaanku ama wakiilka haysata aqoonsiga BIA kugu matali karo USCIS horteeda, waxaad ka helayaa [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams) Si aad u ogaato in qof yahay wakiil aqoonsi ka haysta BIA, waxaad tegi karta xafiiska kuugu dhaw ee USCIS ama ka fiiri liiska BIA ee dhawaantan la aqoonsaday ama la ansixiyey ee ku jira [www.justice.gov/eoir/statspub/raroster.htm](http://www.justice.gov/eoir/statspub/raroster.htm).

## Waa maxay waxyaabaha been- abuurka ah ee badaana la xidhiidha arrimaha soogalaytiga iyo qaxootiga?

Been abuurayaashu badan waxay qaadaan ballamo aad u wanagsan oon la rumaysan karin. Waxay ku odhan xiriidh gaar ahaaneed baan dawladda leenahay, ama kaalmo qaxootinnimo sida griinkaardhka ayaan si degdeg ah kuugu soo saari, ama kaalmooyin kale oo anad xaq u lahayn bey kuu ballanqaadaan.

Mararka qaarkood websaytyo aad moodo kuwa huffan oo dhab ah ayaa kuu hogaamin kara been-abuur Been-abuurayaashu waxay isku xayeysiyaan buugaga telefoonka, qoraal-xaashiyeedyada iyo calamadah dukaanada. Waxa laga yaabaa inay isku xayeysiya raadiyaha iyo jaraa'idka si ay uga faaiideystaan walxaha kala duwan ee lagu baahiyo wararka. Waxaaba dhici karta in qof aad taqaanaa kuu ammaano. Iska jir. Ka hor inta aanad u tegin ku kaa iibiya talo ku saabsan soogalaytiga ama qaxootig, marka hore hubi inay ama inuu yahay garyaqaan ama wakiil ka haysta BIA aqoonsiga.

## Maxaan samayn karaa haddii ahay qof been-abuur looga faa'idaystay?

Haddi qof aad taqaan looga faa'idaystay been-abuur, ogeysii Guddiga Federaalka ee Baayacmushtarka (FTC): [www.ftc.gov/complaint](http://www.ftc.gov/complaint) ama 1-800-4357 Waxaa kale ood been-abuurka u sheegi karta xeer-ilaaliyaha guud ee Gobolkaaga, heyadaha kale ee gobolka ama ururka ku haboon ee garyaqaanada gobolka.

Waxaa jira sharciyo reebaya been-abuurka dhinaca soogalaytiga iyo qaxootiga. Ka baro sharciga gobolka iyo sida aad u sheegi karto been-abuurka halkan: [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams).

Iska ilaali qoyskaagana ka ilaali been-abuurka dhinaca soogalaytiga ama qaxootiga. Baro xaqiiqada dhabta ah oo ka raadso cid kaa caawisa arrimaha soogalaytiaga iyo qaxootiga halkan [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams) ama la hadal telefoonka 1-800-375-5283

Kiiskaaga ama arrintaada waxaad mar walba kala xidhiidhi karta Heyadda Maraynkanka ee Adeegyada Wadaniyadda iyo Soogalaytiga (USCIS). Hadaad rabto in wakill kuu hadlo, fadlan waxaad ogaataa in dad gaar ah oo keliyihi waakiil kaa noqon karaan USCIS horteeda, oo kaala talin karaan dhinaca soogalayiiga iyo qaxootiga.





## Xasuusnow qodobadan

- ✓ Macluamadka dhinaca soogalaytiga iyo qaxootiga ka raadso websaytada dowladda ee rasmiya ah. Websaytada heyadaha dowladda federaalka waxaa ku jira “.gov” ee ma aha “.com”
- ✓ Ka qaado risiidh cidda kuu buuxisa foomamka ee aad lacag siiso.
- ✓ Hubi qofka talo ku siinaya ama wakiil kaa noqonaya USCIS horteeda inuu yahay garya ama aqoonsi ka haysto/haysato BIA.
- ✓ Ku xafid waraaqaha ka socda USCIS meel ammaan ah. Had iyo jeer hayso koopiyada dokumentiga aad u dirto USCIS iyo risiidhaha aad ka hesho USCIS. Risiidhku wuxuu caddaynayaa in codsigaagii ama arjigaagii uu gaadhi USCIS.
- ✓ Ka eego tilmaamaha foomamka USCIS lacagta lagu xareeyo iyo waxyaabaha kale ee loo baahan yahay.
- ✓ Xaalka codsigaagu ku sugan yahay ka eego [www.Uscis.gov](http://www.Uscis.gov) ama la hadal telefoonka 1-800-375-5283.
- ✓ U sheeg FTC, xeer ilaaliyaha guud ee gobolkaaga ama guddiga sharciyaqaanada gobolka wixii been-abuur ama sharci darro ah ee lagugu sameeyo.
- ✓ Lacag ha ka bixin foomamka USCIS. Dhammaan foomamka USCIS waa lacag la'aan, waxaanad ka helayaa: [www.uscis.gov](http://www.uscis.gov) ama xafiiska USCIS ee kuugu dhow.
- ✓ Ha saxeexin foomamka oo madhan. Hubi inay dhammaan foomamku buuxaan inta aanad saxeexin.
- ✓ Ha saxeexin foomamka hadii ay ku jiraan macluumaad been ah. Hubi in ay dhammaan macluumaadku sax yihiin oo ay run yihiin. Inta aanad saxeexin.
- ✓ Qofna ha ka yeelin inuu kuu hayo dokumentigaaga curiska ama orijinaalka ah.
- ✓ Ha saxeexin dokumenti aanad garanin waxaa ku yaal. Ka hor inta aanad saxeexin dokumentiga akhri, ka baraandeg oo hubi inaad fahamtay.

Markaad raadsanayso cid ku caawisa, ogow inay ku dhaawici karto haddi si khaldan lagu caawiyo.

Baro xaqiiqada dhabta ah oo ka raadso cid kaa caawisa arrimaha soogalaytiga iyo qaxootiga halka [www.uscis.gov/avoidscams](http://www.uscis.gov/avoidscams) ama la hadal telefoonka 1-800-375-5283.



## MUCAAWINADA KHALDANI WAY KU DHAAWACI KARTAA

### KA DIGTOONOW BEEN-ABUURKA DHINACA SOOGALAYTIGA IYO QAXOOTIGA

Mararka qarkood, dadbaa iska dhiga inay yihiin ku-xeeldheereyaal dhinaca arrimaha soogalaytiga iyo qaxootiga si ay lacagtaada u dhacaan. Tani sharciga way ka soo horjeedaa.



Dadka kale way kaa caawin karaan buuxint foomamka iyagoo kuu niyad san, laakiin uma tababarna inay kaala taliyaan sharciga soogalaytiga iyo qaxootiga iyo hubraaciisa.



U.S. Citizenship and Immigration Services